

Sinulla on todettu antibiooteille vastustuskykyinen bakteeri (tai bakteerit):	Waxaa lagaa helay bakteeriyada iska caabbin karta antibiyootiga (ama bakteeriyada):
☐ MRSA	☐ ESBL Klebsiella pneumoniae
☐ CPE	☐ VRE
☐ MDR Pseudomonas aeruginosa	☐ MDR Acinetobacter baumannii
☐ ESBL E. coli ja tai muu ESBL-enterobakteeri	

Sairaalahoidossa ollessa huomioitavia asioita:	Arrimaha ay muhiimka tahay in la tixgeliyo marka isbitaalka lagu jiro:
Antibiootille vastustuskykyisen bakteerin säilyminen elimistössä on hyvin yksilöllistä. Joillakin se häviää saman tien, joillakin se voi kestää vuosia. Sairaalassa antibiooteille vastustuskykyisten bakteerien leviämistä pyritään estämään käsihygienian avulla. On tärkeää, että noudatet sairaalahoidon aikana henkilökunnan ohjeita käsihygieniasta ja liikkumisesta osastolla.	Bakteeriyada u adkaysata antibiyootiga in ay xubnaha jirka ku sii jirto, waa arrin ay dadku ku kala duwan yihiin, oo qof walba ay tahay si isaga u gaar ah. Qaar bay bakteeriyadu si degdeg ah uga baxdaa, halka kuwa kalena ay sannado ku sii jirto. Isbitaalka dhexdiisa waxaa la isku dayaa in la joojiyo faafidda bakteeriyada u adkaysata antibiyootiga, iyada oo la nadiifinaayo gacmaha. Waa muhiim in aad raacdo hagista ama tilmaanbixinta shaqaalaha isbitaalka ee la xiriirta nadaafadda gacmaha iyo dhaqdhaqaaqa ama socodka gudaha ee qaybta aad ku jirto ee isbitaalka.
<u>Poistu huoneestasi vain hoitohenkilökunnan luvalla.</u> Huoneesta poistuessa sinulla tulee olla puhtaat vaatteet ja sidokset.	<u>Ka bax qolkaaga marka aad fasax ka hesho shaqaalaha daryeelka oo keliya.</u> Marka aad ka

	baxayso qolka, waa in aad xirataa dhar iyo faashado (sidokset) nadiif ah.
Desinfioi kädet ottamalla kaksi painallusta käsihuuhdetta ja hieromalla huuhde käsiin	Jeermiska ka nadiifi gacmaha adigoo gacanta ku shubanaaya laba xantoobo oo jeermis dilaha ah, islamarkaana gacmaha si fiican u marmari jeermisdilaha
• aina huoneesta poistuessa ja sinne palatessa	• markasta oo aad qolka ka baxayso, iyo marka aad ku soo laabanayso
• wc:ssä käynnin yhteydessä - käsien saippuapesun ja kuivaamisen jälkeen	• marka aad gasho suuliga ama musqusha - markaad gacmaha saabuun ku dhaqdo oo aad qalajiso kaddib.
• ennen ruokailua	• Inta aan wax la cunin kahor
Vältä katetrien, laskuputkien (dreenien) ja haavojen turhaa koskemista.	Ka fogoow taabashada aan loo baahnayn ee tuubooyinka katiitarka, tuubooyinka dhiigga ama dheecaanka (dreeni), iyo dhaawacyada.
Pese lisäksi kädet vedellä ja saippualla aina, kun ne ovat likaiset.	Intaas waxaa dheer, gacmaha waxaad ku dhaqdaa saabuun iyo biyo, mar kasta oo ay wasakhaysan yihiin.
Pidä lasten lelut huoneessa. Sairaalan leluja ei vaihdeta ilman hoitohenkilökunnan lupaa.	Alaabta ciyaarta ee carruurta waxaa marwalba aad ku haysaa qolka gudhiisa. Alaabta ciyaarta ee isbitaalka lama beddeli karo, iyadoo aan oggolaansho laga haysan shaqaalaha.
Vierailijoiden on tärkeä noudattaa seuraavia ohjeita:	Waa arrin aad muhiim u ah in ay martidu u hoggaansamaan tilmaanbixinta soo socota:
• Desinfioi kädet huoneeseen mennessä ja sieltä poistuessa. Ota kaksi painallusta käsihuuhdetta ja hiero huuhde käsiin. Pese	• Jeermiska ka nadiifi gacmaha adigoo gacanta ku shubanaaya laba xantoobo oo jeermisdilaha ah, islamarkaana gacmaha si fiican u marmari

kädet vedellä ja saippualla, kun ne ovat likaiset.	jeermisdilaha. Gacmaha waxaad ku dhaqdaa saabuun iyo biyo, mar kasta oo ay wasakhaysan yihiin.
Vierailijoiden ei tarvitse käyttää suojaimia.	Martida uma baahna in ay xirtaan dharka ama qalabka difaaca (sida gacangashiga, afxirka iwm.
Vanhemmat huolehtivat lapsivierailijoiden käsien desinfioinnista. Lapsivieraiden tulee pysyä huoneessa vierailun ajan.	Waaliddiintu waa in ay hubiyaan in carruurta martida ah ay isticmaaleen jeermisdilaha gacmaha iyo inkale. Carruurta martida ah waa inay joogaan qolka, oo aanay ka soo bixin inta ay booqashadu socoto.
Kotona huomioitavia asioita:	Arrimaha muhiimka ah in la sameeyo marka guriga la joogo:
Antibiooteille vastustuskykyisen bakteerin löytyminen elimistöstä ei vaikuta normaaliin elämään. Löydöksestä ei tarvitse kertoa terveydenhuollon ulkopuolella kuten työpaikalla, koulussa, päiväkodissa, harrastuksissa tai läheisille.	Helitaanka jirkaaga laga helay bakteeriyada iska caabbin karta antibiyootiga, ma ahan arrin saamaynaaya nololmaalmeedka caadiga ah. Looma baahna in arrinkaas loo sheego cid ka baxsan adeegyada daryeelka caafimaadka, sida goobta shaqada, dugsiga, xarunta xannaanada, goobaha ciyaaraha ee hiwaayadaha ama ehelka.
Sairaalahoitoon joutuessasi on tärkeää, että kerrot hoitohenkilökunnalle, jos sinulla tai perheenjäsenelläsi on todettu antibiooteille vastustuskykyinen bakteeri. Silloin lääkäri osaa ottaa sen huomioon, mikäli hoidossasi tarvitaan antibioottia.	Marka aad gasho daryeelka isbitaalka waa muhiim, in aad u sheegto shaqaalaha caafimaadka, haddi adiga ama xubin qoyskaaga ka mid ah laga helay bakteeriyada iska caabbin karta antibiyootiga. Arrinkaas waxaa uu dhakhtarka ka caawinayaa in uu tixgelinta siiyo, haddii marka daryeelkaaaga la qorshaynaayo loo baahdo in lagu daro antibiyootig.

Pese kädet vedellä ja saippualla	Gacmaha ku dhaq biyo iyo saabuun
kun kädet ovat likaiset	marka ay gacmuhu wasakhaysan yihiin
ennen ruoan valmistamista ja ruokailua	cunto diyaarinta iyo cunto cunista kahor
WC käynnin tai vaipanvaihdon jälkeen	marka aad musqusha ama suuliga gasho kaddib iyo marka aad xafyaadda ilmaha ka beddesho kaddib
ennen ja jälkeen haavan hoitamisen	marka aad dhaawaca daryeesho kahor iyo kaddibba.
Laita likaiset haavasidokset ja vaipat suoraan jätepussiin.	Faashadaha aad dhaawaca ka soo furtay ee wasakhda ah iyo xafaayaddaba waxaad si toos ah ugu riddaa bacda qashinka.
Käytä henkilökohtaista käsipyyhettä.	Waxaad isticmaashaa shukumaanka ama tuwaalka gacanta ee kuu gaarka ah.
Voit käyttää kodin siivouksessa tavallisia siivousaineita.	Marka aad guriga nadiifinayso waxaad isticmaali kartaa maaddooyinka ama walxaha wax lagu nadiifiyo ee caadiga ah.
Pese astiat ja pyykki kuten tavallisesti.	Dharka iyo weelasha waxa aad u dhaqdaa sidii caadiga ahayd.
Voit käydä uimahallissa ja yleisessä saunassa, jos ihosi on ehjä, eikä sinulla ei ole haavoja.	Waad tagi kartaa hoolka dabaasha iyo sawnada guud ee dadka ka dhexeysa, haddii uu jirkaaga ama maqaarkaaga bedqabo, oo wax dhaawacyo ahna aanay kugu oollin.
Kaikki voivat vierailla luonasi iästä riippumatta.	Qof kasta wuu kugu soo booqan karaa meesha aad ku jirto, da'duu doono ha ahaadee.